# Korodhka Xaddiga Qalin-jabinta PPS 84.4%

Maalintii Khamiistii, Waaxda Waxbarashada Oregon(ODE) waxay siidaayeen xaddiga korodhka qalin-jabinta sanad-dugsiyeedka 2020-21, iyada oo boqolkiiba ah 84.4% Dugsiyada Dadweynaha Portland ardayda qaadanaya shahaadadda Dugsiga Sarre afarta sanno gudahood(Diploma), tani waa natiijo cajiib ah taasi oo ay korodhkani kor u socday 12 sanno oo isku xigga.

Ardaydii Dugsiga Sarre ka qalin-jabisay sanad-dugsiyeedkii 2021 xaddiga qalllin-jabintu ka korodhay 84.4%, halkii ay ka ahayd xaddiga qalin-jabinta sanadkii la soo dhaafay 83.7%. Tani waa korodh dhan 0.7% sanadkii la soo dhaafay iyada oo ah qalin-jabintii ugu sarreysay ee ardayda PPS ka qalin-jabisay ilaa iyo intii la qabatimay wadaraynta kooxaha barnaamijyada afarta sanno ee dugsiga sarre sanadkii 2010. Intaas waxaa dheer, Ardayda Dugsiga Sarre ka qalin-jabisay sanadkii 2021 in 90% ay ku qalin-jabiyeen shan sanno gudahood- taasina waa wax cajiib ah xaddiga guusha ee ardayda PPS.

"Waxaa aad ugu hanweynahay adkaysiga iyo ka go'aanshaha ardaydeena intii lagu gudo jiray markii uu ina haleelay xanuunka faafaya kaasi oo keenay inay si weyn waxbarashadii dadweynuhu hakad gasho iyo waayo-aragnimadii barashadu," waxaa la wadaagay **Guadalupe Guerrero, Guddoomiyaha Waxbarashada Dugsiyada Dadweynaha Portland**. "Wanaagaa togan waxaa loo nisbeynayaa korodhka ay ardaydeena PPS ay helayaan shahaadadda dugsiga sarre dadaaladda naf hurka ah ee ay sameeyeen macallimiinteena, shaqaalaha iyo saaxiibada bulshada oo taageeray arday kasta oo ka mid ah ardaydeena guushooda."

Xogta cusub ee la siidaayey sanad-dugsiyeedka 2020-21 waxay ku tusaysaa in PPS:

- Ardaydoodu ay sii wadaan xaddiga korodhka qalin-jabinta ee korodhay iyo korodhka xaddiga marka la garab dhigo ardayda da'dooda ah ee Degmada Multnomah iyo gobolka Oregon oo dhanba.

- Saddex ka mid ah afartii ardayd ee Madow ama Laatiino ah waxay ku qalin-jabiyeen afar sanno gudahood.

- In ka badan nus dugsiyada sarre ee PPS waxay soo gudbiyeen xaddiga qalin-jabinta oo ka sarreysa 90%, oo ay ka mid yihiin Jefferson(91%) iyo Benson (93%).

- Dugsiga Sarre ee Benson, dugsiga manhajka gaarka leh ee xirfadda waxbarashada farsamada PPS , qalin-jabinta ardayda madow 91% iyo qalin-jabinta ardayda Laatiinaha ah 90% ee sanad-dugsiyeedka 2021, ardayda Madow iyo kuwa Laatiinaha waxay 15% ka sarreeyaan celceliska degmada marka la garab dhigo ardayda Madow iyo kuwa Laatiinaha ah.

- Ardayda laxaadka la' ee Dugsiga Sarre Benson (88%), Jefferson (87%), Lincoln (86%) iyo Franklin (80%) waxa ay dhaafeen celceliska degmada xaddiga qalin-jabinta ee ardayda laxaadka la'.

*Portland Public Schools is an affirmative action and equal opportunity employer.*

Xaddiga qalin-jabintani waa natiijada dadaalada ay sida wada jirka ah u sameeyeen hoggaamiyaasha dugsiga, macallimiinta, shaqaalaha PPS, iyo saaxiibadeenu in si fiican loo xaqiijiyo iyo taageerada ardayda inay buuxiyaan shuruudaha looga baahan yahay inay ka qalin-jabiyaan dugsiyada sarre, khaas ahaan inta lagu guda jiro waqtigan caalamka ka jiro xanuunka faafaya kaasi oo siyaabo kala duwan u saameeyey nolosha ardayda. Dugsiyada sarre ee PPS waxay sii wadayaan inay meel mariyaan dugsi degmo ahaan *Qorshaha Guusha Ardayda Dugsiyada Sarre dhowr sanno* si loo xoojiyo barnaamijyada waxbarashada heerka dugsiyada sarre.

Intaas waxaa dheer, ardaydu arkeen korodh joogta ah dhinaca dhibcaha ay helayaan kuwaasi u sahlay fursadaha ay heli karaan, oo ay ka mid yihiin waxbarashada galinta dambe la qaato marka dugsiga ardayda laga fasaxo maalintii, labada maalmood ee Sabtida/Axada, iyo inta lagu jiro fasaxa xilliga xaggaaga, sidii ay u xaqiijin lahaayeen inay ardaydu hayaan jidkii ay ku qalin-jabin lahaayeen. Istaraatijiyada maalgalinta ee ilaha maalgalinta gobolka ee cusub, oo ay ka mid yihiin Measure 98 iyo lacagta Koontada Maalgalinta Ardayda, waxay siisay ardayda inay helaan dhibco dheeraad ah oo ikhtiyaari ah, la-taliyaasha ku salaysan dugsiyada iyo gargaarka kale, oo ay ka mid yihiin xoojinta maalgalinta diirada saaraysa in ardayda la siiyo maadooyin CTE ah. Wada jir ahaan, addeegyadani iyo taageeradu waxay u abuureen fursado inay ardayda PPS guuleystaan ilaa wixii ka dambeeya waxbarashada dugsiga sarre ee dugsiyada Portland.

"Tirada ardayda ka qalin-jabisay sanad-dugsiyeedka Fasalka 2021 waa sawirka dhabta ah ee macallimiinteena, la-taliyaasheena, maamulayaasheena, saaxiibada bulshadeena, iyo taageerada shaqaalaheena, kuwaasi oo wada jira, iyada oo lagu dhex jiro isbedelo,waxaa ka go'neyd inay diirada saaraan sidii ay u arki lahaayeen in ardaydeenu u qalin-jabin lahaayeen," waxaa sidaa tidhi **Margaret Calvert, Guddoomiyaha Waxbarashada Dugsiyada Sarre iyo Qalin-jabinta Leh Dhowr Jid**. "Ardaydeenii sanad-dugsiyeedkii Fasalka 2021 waxa ay muujiyeen wixii ay bulshadeenu ugu yeedho sawirka qallin-jabinteena — oo aynu ku magacaabi karno adkaysiga, la qabsiga iyo qalin-jabin ka turjumeysa mustaqbalka. Waxaan si weyn ugu hanweynahay guul wadareedkeena."

Afartii sanno ee la soo dhaafay, PPS waxay sii wadeen inay maalgaliyaan addeegyada dhaqano gaarka ah ee kor loogu qaadayo ardaydeena midabka leh dugsiyada sarre. "Waxa aynu ognahay in ardaydu ay u badan tahay inay ka qeybqaataan barashadooda iyo inay u badan tahay inay qalin-jabiyaan marka waayo-aragnimadooda waxbarasho ee dugsiga sarre ee ka jawaabayaa caqabadaha guushooda," waxaa la wadaagay **Dani Ledezma, La-Taliye Sarre Guddoomiyaha Waxbarashada ee Cadaalada Bulshada iyo Sinnaanata Jinsiyadaha**. "Iyada oo la arkayo horumarkani joogtada ah inuu yahay astaan xoogan kuna tusaysa marka la kaashado hay'ado ay hoggaanka u hayaan bulshadu ay keeneyso korodh iyo guusha ardayda midabka leh."

Xaddiga qalin-jabinta 84.4% waxay ka tarjumeysaa boqolkiiba 25.8 korodhka dhibcaha guud ahaaneed ee xaddiga qalin-jabinta ilaa sanadihii 2009-2010, iyada oo boqolkiiba 4.8 ay kordheen dhibco dhan ilaa iyo saddexdii sanno ee ugu dambeeyey kaliya.

"Waxaan qeyb ka ahay ardaydeena iyo shaqaalaheena u dabaaldegaya guusha cajiibka ah ee qalin-jabinta Dugsiyada Dadweynaha Portland," sidaas waxaa tiri **Michelle DePass, Guddoomiyaha Golaha Waxbarashada PPS**. "Xogtani cusub waa xusuusin muhiim ah taasi oo inay wali jirto hawlo badan oo u baahan inaan qabano sidii loo yareyn lahaa faraqa u dhexeeya ardayda kala duwan, gaar ahaan ardayda Madowga ah, Maraykanka Asalka ah iyo Native Hawaiian Pacific Islander. Waxaynu u baahanahay inay sameyno wax kasta oo lagu soo yareynayo faraqaasi. Saaxiibadayda Golaha Waxbarashadaiyo anigu waxaan rajeyneynaa

kordhino dadaalkayaa anaka oo kaashaneyna Guddoomiyaha Waxbarashada Guerrero iyo shaqaalaha degmada sidii loo xaqiijin lahaa in arday waliba guuleysto iyaga o dhammeynaya dugsiga iyo qorshaha waxbarasho ee ka dambeeya dugsiga sarre.”